

**PRESIDENTIAL DECREE BANNING SALE OF PUBLIC PROPERTY
14 JUNE 2007**

**Ku simaha M/weynaha Somaliland oo mamnuucay kala iibsiga
guryaha iyo dhulka dawladda**

Hargeysa, 16 June, 2007 (Geeska) - Madaxweyne ku xigeenka Somaliland Md. Axmed Yuusuf Yaasiin oo hadda ah ku simaha Madaxweynaha Somaliland, ayaa wareegto ku mamnuucay kala iibsiga guryaha dawladda iyo dhulka bannaan ee shacabka ee magaalo madaxyada dalka Somaliland. Md. Axmed Yuusuf Yaasiin, wareegtadaas uu soo saaray oo soo baxday **14/06/07**, balse shalay la soo gaadhsiiyay saxaafadda, ayaa waxa uu ku amray inay dhaqan geliyaan dhaw wasaaradood, taliyayaasha ciidamada iyo guddoomiyayaasha gobolada, waxaanay wareegtadaas oo dhammaystirani u dhignayd sidan:

"Markuu helay :- Warbixin fara-badan oo ka hadlaaya sifaha sharci-darada ah ee Guryaha Dowlada lagu kala iibsado.

Markuu Ogaaday:- in dhulka danta guud, dhulka xeelliga xeebta iyto shacabka Magaalo Madaxyada dalka oo Dowlada ugu qorshaysan dan-guud fasax la'aan lagu dhisanaayo.

Markuu Helay:- Wareegtooyin badan oo Madaxwaynayaashii kala dambeeyey ku mamnuuceen kuna joojiyeen in la kala iibsado Guryaha Dowlada iyo bixinta dhulka danta guud, dhulka xeelliga xeebaha iyo shacabka ee Magaalo Madaxyada dalka iyo dhulka danta guud loo aqoonsan yahay.

Markuu X/qsaday:- in guryihii Dowlada dadkii sifaha ku meel-gaadhka ah ugu jiray ay xaalaashadeen oo sida ay doonaan ugu tagrifalaan ama dhalan rogaan dhiskiisii hore iyo dhulkiisiiba sidaana ku lunsadaan hantidii qaranka ee Maguurtada ahayd.

Markuu Arkay:- Una kuur galay inaan haba-yaraatee dheg jalaq loo siiniin lana tixgalin sharciyada iyo qawaaniinta u dejisan Qaranka.

Markuu y/saday:- dhibaatada iyo khasaaraha dhaqaale ee ka soo gaadhi-kara kala iibsadayaasha Maadaama aanay ahayn hanti ay leeyihii.

Markuu Arkay:- baahida wayn ee dawladdu u qabto inay toos ula wareegto dhammaan Guryihii Dowlada ee sifaha ku meel-gaadhka ah loogu jniray.

Wuxuu soo Saaray Wareegtadan:-

1. laga bilaabo Taariikhda Wareegtadan waxa mamnuuc ah sida dadban iyo si toos ahba kala iibsashada Guryaha Dowlada ee ka dhisan JSL.
2. in cidda guriga ku jirta ee iibisa Guriga Dawlada iyio cidda ka iibsataba, uu iibkoodaasi xaaraan iyio sharci darro yahay, wax magdhow ahna aan loo celin doonin haba yaraatee.
3. cidda degan ama ku jirta Guriga Dawladda ayay Xukuumadu ku ogaanaysaa oo lagala xisaabtamayaa tan iyo inta dawladdu uga baahanayso.
4. cidda Degan Guriga Dowladda haddii ay ka maarmaan waxay toos ugu soo wareejinayaan Wasaaradda Hawlaha Guud ama dawlada Hoose ee Degmadaasi.
5. cidda ku jirta Guriga dawladda ee dhulkiisa ka dhisata dhismo kale, waxa dhismahaas loo aqoonsan doonaa hanti Ummaddeed.
6. dhulka xeelliga xeebaha ah, shacabka Magaalo Madaxyada iyo dhulka ay dawladdu u aqoonsan tahay dan guud dhamaantii waa dhul xukuumada ugu qorshaysan Dan-guud bixintisuna waa ka xaaraan, lama seexan karo, lama calaamadaysan karo lamana dhigi-karo dhagxaan iyo wax kale oo tilmaan ah.
7. cidda guryaha dowlada ku jirtaa ha ogadaan in berri ka maalin Dawladdu kala wareegi doonto, kalana xisaabtani doonto.
8. Guryaha dawladda waa hanti qaran cidda ku jirtaana waa inay iska bixiyaan kirada guryaha eeku waajibtay sida ugu dhakhsaha badan.
9. cidda ku jirta guryaha Dowladda ee bixin wayda kirada lagu leeyahay kuna dhammaysriti-wayda sannad kan 2007 Aakhirkisa waxa loo sheegayaa in sharciga la hor-gayndoono lagana saari doono.

B: Waxa la filayaa inay dhaqan geliyaan wareegtadan dhammaan.

1. Wasaaradda Hawlaha Guud.
2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha
3. Wasaaradda Maaliyadda
4. Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka
5. Hanatidhawraha Guud ee Qaranka
6. Xisaabiyyaha Guud ee Qaranka
7. Gudoomiyeeyaasha Gobolada Dalka
8. Gudoomiyeeyaasha D/heese ee Gobolada iyo Degmooyinka Dalka
9. Taliyeeyaasha Ciidamada Qaranka.”

Xigasho: Wargeyska Geeska Afrika

Source: HORN OF AFRICA NEWSPAPER (Somaliland Daily Paper)